



Codso daryeel caafimaad:

- adigoo galaya barta internetka [Benefits.Ohio.Gov](https://www.Benefits.Ohio.Gov),
- taleefan udir (800) 324-8680, ama
- si shaqsi ah ugutag Waaxda Degmadaada ee Adeegyada Shaqada iyo Qoyska.

Ka firi xafiiska deegaanka adoo galaaya bogga [JFS.Ohio.Gov/County](https://www.JFS.Ohio.Gov/County).

Wac Laynka Macaamiisha ee Tooska ah ee Medicaid oo ah (800) 324-8680 si lagaaga caawiyo buuxinta codsiga ama su'aalaha kale ee aad qabto.

Macluumaad dheeri ah waxaad kahelaysaa bogga [Medicaid.Ohio.Gov](https://www.Medicaid.Ohio.Gov).

Ohio

Department of
Medicaid

Mashruuca Kansarka Naasaha iyo Ilmo-galeenka

Waaxda Medicaid ee Ohio iyo Waaxda Caafimaadka ee Ohio waxay adeegyo iyo caymis caafimaad siiyaan dumarka mudan in la siiyo ee ubaahan daaweynta kansarka naasaha iyo/ama ilmo-galeenka, oo ay ku jiraan xaaladaha hore ee kansarka ka horeeya.

Baaritaannada kansarka naasaha iyo ilmo-galeenka waxaa dheer adeegyo kale oo ka baarid ah, oo ay ku jiraan mammogaram naasaha lagu baaro, baaritaanka sootiridda (pap test), booqashooyinka xaafiiska, iyo saamiqaadka cadka (biopsies). Waxaa sidoo kale la helayaa adeegyo kiisaska lagu maamulo.

Baaritaanka ka dib, haddii la helo kansarka naasaha iyo/ama kansarka ilmo-galeenka, ama xaaladaha kansarka ka horeeya, Waaxda Medicaid Ohio waxay bixinaysaa daaweynta iyo daryeelka caafimaad ee qofka xaqa u yeeshay.

Warbixin dheeri ah oo ku saabsan Mashruuca Kansarka Naasaha iyo Ilmo-galeenka:

- booqo barta internetka ee [Medicaid.Ohio.Gov/BCCP](https://www.Medicaid.Ohio.Gov/BCCP),
- laxariir Waaxda Degmadaada ee Adeegyada Shaqada iyo Qoyska, ama
- wac Waaxda Caafimaadka ee Ohio ka wac 1-844-430-BCCP (2227).